بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَٰنِ الرَّحِيمِ

DASTUURKA XISBIGA QARANSOOR

Qaransoor.so

15.03.2020

Dastuurka Xisbiga Qaransoor

WAXAA HALKAAN KU ANSIXINAYNAA DASTUURKA XISBIGA QARANSOOR

Nagu soo booqo

www.qaransoor.so

Tusmo

Qodobka 1aad
Magaca Xisbiga 8
Qodobka 2aad
Astaanta Xisbiga & Midabka 8
Qodobka 3aad
Calanka Xisbiga 8
Qodobka 4aad
Xaunta xisbiga 9
Qodobka 5aad
Hiigsiga, Ujeedka, iyo Qiyamka Xisbiga 9
Qodobka 6aad
Mabadii'da Guud ee Xisbiga 9
Qodobka 7aad
Xubinimada Xisbiga.....10
Qodobka 8aad
Sharuudaha Xubinnimadda 10
Qodobka 9aad
Xaquuqda Xubnaha Xisbiga 11
Qodobka 10aad
Waajibaadka iyo Masuuliyadaha Saaran Xubnaha 11
Qodobka 11aad
Waayidda Xubinimadda Xisbiga 11
Qodobka 12aad
Qaab Dhismeedka Xisbiga Qaransoor 12
Qodobka 13aad
Shirweynaha Xisbiga Qaransoor 12
Qodobka 14aad
Waajibaadka Shirweynaha 13

Qodobka 15aad
Golaha Qaranka 13
Qodobka 15aad
Hawlaha Golaha Qaranka.....14
Qoddobka 16aad
Fadhiyada Golaha Qaranka 15
Qodobka 17aad
Golaha Fulinta 15
Qodobka 18aad
Dhisida Golaha Fulinta.....16
Qodobka 19
Xilalka Golaha Fulinta waxaa kamid ah: 16
Qodobka 20aad
Waajibaadka Golaha Fulinta 16
Qodobka 21aad
Hoggaamiyaha Xisbiga 17
Qoddobka 22aad
Shuruudaha Hoggaamiyaha Xisbiga.....17
Qoddobka 23aad
Guddoomiyaha Xisbiga.....18
Qoddobka 23aad
Guddoomiye Ku Xigeenada Xisbiga 18
Qoddobka 24aad
Xoghayaha Guud iyo Ku Xigeenkiisa.....18
Qoddobka 25aad
Musharixiinta Golayaasha Sharci Dejinta iyo Deegaanka 19
Qoddobka 26aad
Qaybaha Xisbiga.....19
Qoddobka 27aad
Hawlaha Guddiyada Xisbiga 20

Qoddobka 28aad
Guddida Anshaxa.....20
Qoddobka 29aad
Falalka Anshax Marinta 21
Qodobka 30aad
Wajibaadka Guddiga Anshax-marinta 21
Qodobka 31aad
Habraaca dacwad Qaadista.....21
Qodobka 32aad
Waajibaadka Guddomiyaha gudiga anshaxa.....22
Qodobka 33aad
Go'aanadda Guddiga Anshax marinta.....23
Qodobka 34aad
Dhisida Guddiga Xalin Khilaafaadka 23
Qodbka 35aad
Waajibaadka Guddiga Xallinta Khilafadka Xisbiga Gudihiisa.....23
Qodobka 36aad
Habraaca Xalinta Khilaafaadka Guddiga.....24
Qosdobka 37aad
Waajibaadka Gudoomiyah guddiga.....25
Qodobka 38aad
Qaabka Go'aan gaarista Guddiga Xalinta Khilaafaadka 26
Qodobka 39aad
Dhisida Guddiga Racfaanka 26
Qodobka 40aad
Hab-Raaca Racfaanka 26
Qodobka 41aad
Guddiga Racfaanka.....27
Qodobka 42aad
Dowrka Haweenka iyo Dadka laga tirada badan yahey.....27

Qodobka 43aad
Xafiiska Mutadawiciinta, Shaqaalaha iyo Hawl Wadeenada Xisbiga. 28
Qodobka 44aad
Saxiixa Idman ee Saraakiisha Xisbiga 28
Qodobka 45aad
Dokumentiyada Siyaasadeed ee Xisbigu Soo Saaro....29
Qodobka 46aad
Maamulka, Maaliyadda & Hantida xisbiga Dakhliga & Kharashka 29
Qodobka 47aad
Dakhliga Xsibiga 30
Qodobka 48aad
Habka Maamulka iyo Maareynta Hantida Xisbiga....30
Qodobka 49aad
Baabi'inta Xisbiga iyo Hantidiisa....31
Qoodbka 50aad
Meel ku Ogaanshaha Hantida xisbiga....31
Qodobka 51aad
Hab-raaca Loo Baabi'inayo Xisbiga....31
Qodobka 52aad
Doorashooyinka....31
Qoddobka 53aad
Nidaamka loo marayo wax ka bedelidda iyo kaabista Xeerka Xisbiga....32
Qoddobka 54aad
Fasiraada Xeerka Xisbiga....32
Qoddobka 55aad
Xeer Hoosaad....33
Qoddobka 56aad
Dhaqangalka Xeerka Xisbiga 33
Qodobka 57aad
Wakiilada Dalka Bannaankiisa....33

Qodobka 58aad
Sharuudaha Midowga.....33
Qodobka 59aad
Ansixinta Midowga.....34

Qodobka 1aad

Magaca Xisbiga

Magaca xisbiga waa **Qaransoor.** Waa labo eray oo la isku daray ‘qaran iyo soor’. Erayga Qaran ama wadan waa bulsho deggan oo dadka ku dhisan yihiin luuqad wadaag, dhul, taariikh, qowmiyad, ama isku-xirnaan xagga maskaxda ah oo lagu muujin karo dhaqan wadaag. Erayga Soor waxay u taagan tahay waa sooris qaran, marti gelinta qarannimada ummada Soomaaliyeed.

Xisbiga xaruntiisa dhexe waa Muqdisho. Wuxuu wakiilo ku leeyahay gobolada Soomaaliya qaarkiisa iyo wadamada shisheeye.

Qodobka 2aad

Astaanta Xisbiga & Midabka

Astaanta xisbiga Qaransoor waa wareeg dhexda ku taagan tahay gacan xoog badan oo sida geedka loo sameeyey hoosna ku leh xidado, sidoo kale labada dhinacna waxaa ka saaran wajiyada labo libaax. Qeybta kore waxa kaga qoran Xisbiga hoosna Qaransoor.

Midabka waa baluug biyo-biyo ah oo xiga cirka oo aan caad saarneyn.

Qodobka 3aad

Calanka Xisbiga

Calanka xisbiga waa baluug cirka u eg oo dhexda kaga taalo astaanta xisbiga.

Qodobka 4aad

Xarunta xisbiga

Xisbiga waxa uu xarun dhexe ku yalanayaa Muqadishu waxa uuna xarumo kafuranayaa goboladda dalka.

Qodobka 5aad

Hiigsiga, Ujeedka, iyo Qiyamka Xisbiga

1. **Hiigsiga xisbiga**

U hawlgelida sidii loo heli lahaa qaran awood u leh isku filnaansho dhaqaale iyo mid amni, horumarinta laamaha sirdoonka iyo militariga, la dagaalanka xagjirnimada, dhisida nidaam waxbarasho oo ku dhisan tayo aqooneed iyo mid diineed.

2. **Ujeedka xisbiga**

Ujeedka xisbiga ayaa ah inuu la yimaado dib u habeyn siyaasadeed oo cusub, inuu la yimaado fikir iyo dhaqdhaqaaq dhiirrigeliya danaha umadda, gaar ahaan ujeedada laga leeyahay ayaa ah helitaanka iyo jiritaanka qarannimada ummada Soomaaliyeed.

3. **Qiyamka xisbiga**

U hawlgelida siddii ummada soomaaliyeed ay u heli lahaayeen xorriyad dhul, dhaqan, diin, waxbarasho iyo mid dadnimo. Dhisida awood militari oo awood u leh illaalinta amniga guud ee muwaadiniinta iyo dalka, dhisida nidaam waxbarasho oo tayo leh aan waligeed Soomaaliya lagu arkin, la dagaalanka musuq-maasuqa, saraynta sharciga, xoojinta dhaqanka madaniga ah ee ku dhisan simnaan iyo cadaalad bulsho, la dagaalanka hayb-sooca lagu haayo qabiilada laga tirada badan yahay.

Qodobka 6aad

Mabadii'da Guud ee Xisbiga

1. Illaalinta qarannimada Soomaaliyeed, la adeeco dastuurka dalka iyo sharciga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. In muwaadiniinta lagu abaabiyo mabda'a jiritaanka qarannimada iyo dowladnimada Soomaaliyeed, in laga soo horjeesto waxwalbo, cidwalbo, jabhad walbo oo kasoo horjeedo dowladnimada iyo qarannimada Soomaaliyeed.

3. Dhisida Ciidan iyo Haayad Sirdoon qaran oo tayo fiican leh, kuwasoo illaalin kara muwaadiniinta iyo madax banaanimada qaranka.

4. Sidii loogu maarmi lahaa gacmaha shisheeye, isku filnaansho loo gaari lahaa dhinac amni iyo dhaqaalaba.

5. Dib u habaynta nidaamka siyaasiga iyo u howlgalka sidii loo heli lahaa hanaan siyaasadeed oo xisbiyo ku dhisan lehna sharciyad iyo metelaad.

6. In bulshada lagu abaabiyo qiyam shaqo, lagana illaaliyo mabda'a fadhi ku dheraga ah.

7. In Xisbiga Qaransoor rajo badan ka qabo inuu ku guulaysto awooda siyaasadeed ee guud ahaan Soomaaliya iyada oo loo maraayo dastuurka qaranka, waliba hab dimuqraadi ah si loo ixtiraamo, loona fuliyo ajandaha iyo sharuucda kale ee loo dejiyay xisbiga.

8. Xisbiga Qaransoor ayaa soo xuli doona musharaxiinta u tartamaayo golaha baarlamaanka, iyo musharaxiinta doorashooyinka heer madaxweyne, xisbigana waxaa waajib ku ah inay hubiyaan inay fuliyeen shuruudaha musharaxnimo.

9. Xisbiga ayaa qeyb weyn ka qaadan doona dhisida, kobcinta garaadka waddaniyiinta laguna dhiiro geliyo midnimo qaran, sinnaanta, caddaalada, iyadoo aan loo eegin xaalad shaqsi, jinsiga, qabiil iwm

Qodobka 7aad

Xubinimada Xisbiga

Cidwalbo ayaa xubin ka noqon karto xisbiga, waa haddii qofkaas caafimaad qabo. Xubinimada xisbigu waa shaqsi umana gudbi karto cidkale lamana kala dhaxli karo waxayna u furantahay qofkasta oo Soomaali ah oo buuxiya shuruudaha Xeerka Xisbiga.

Qodobka 8aad

Sharuudaha Xubinnimadda

1. Muwaadin walbo oo Soomaaliyeed ayaa kamid noqon kara xisbiga Qaransoor. Xubinimada xisbiga waa u furan tahay cidwalbo oo gaaray da'da 18 jir.
2. Muwaadin walbo oo Soomaaliyeed ama xaq u leh inuu codeeyn karo wuxuu xaq u leeyahay innuu kamid noqon karo xisbiga, waxaana loogu baahan yahay inuu u hoggaansamo dastuurka xisbiga.
3. Waa in uu katirsaneyn Xisbi siyasadeed ama uruuro siyaasadeed kale.
4. Inuu yahay qof caafimaad qabo, sida inuu caqli ahaan caafimaad qabo oo uu awood buuxda u leeyahay gudashada xilkiisa xubinimo.
5. Qof kasta oo raba inuu kamid noqdo xubin kamid ah xisbiga, wuxuu iska diiwaan gelin karaa xafiisyada xisbiga ee dalka gudihiisa iyo debediisaba.

6. Bilkasta xubnaha waxaa waajib ku ah inay bixiyaan qidmada $10 ee billaha ah (Bilkasta 1-deeda illaa 5-teeda)

Qodobka 9aad

Xaquuqda Xubnaha Xisbiga

1. Xubin kasta waxa ay xaq u leedahay:-
   a) In lagu dooran karo xisbiga gudihiisa. Sidoo kale, innuu ka qeyb qaadan karo dhammaan hawlaha xisbiga iyada oo la raacaayo shuruucda iyo xeerarka la dejiyay.
   b) Inuu ka qeyb qaadan karo doodaha ay qabato xisbiga sida ku saabsan arrimaha xisbiga gudihiisa iyo doodaha kale asigoo matalaayo xisbiga.
   c) Inuu soo jeedin karo fikradihiisa, aragtiyaashiisa.
   d) In uu siga casilo xubin nimadaa xisbiga.
2. Xubnaha xisbiga waa in ay helaan kaarka xubinimada, kaasoo ku qoran yahay magaca seddaxan ee qofka, goobta uu ka qaatay kaarka.

Qodobka 10aad

Waajibaadka iyo Masuuliyadaha Saaran Xubnaha

1. Waa innuu illaaliyaa, kor u qaadaa aragtida, barnaamijyada siyaasadeed iyo magaca xisbiga.

2. Innuu u hoggaan sannaado xeerarka iyo go'aamada ka soo baxa xisbiga. Xubin kasto waa inay u hoggaansanaato sharciga iyo xeerarka xisbiga oo ku saabsan waxwalbo oo khilaaf ku saabsan. Haddii ay noqoto dacwad nooc walbo la xariir maamulayaasha xisbiga si xaqaaga laguugu soo dhiciyo.

3. Innuu ka hortago waxwalbo oo bulshada iska hor imaad u keeni karo.

4. Innuu soo bandhigo, daboolka ka qaado wixii qalad ah oo ka dhacay xisbiga gudihiisa ah, asigoo la kaashanaayo maamulka ama kusoo bandhigo shirarka wadatashiga xisbiga.

5. Innuu bixiyo khidmada iyo innuu illaaliyo sirta sumcada xisbiga.

6. Innuu faafiyo mabdii'da, aragtida iyo barnaamijyada xisbiga una istaago gudashada waajibaadka xubinnimo.

Qodobka 11aad

Waayidda Xubinimadda Xisbiga

1. Haddii qofka iskii go'aan ugu gaaro iska casilada xubinimada xisbiga. Waa in xubinta iscasilayso qoraal ka soo qortaa sababaha iscasilaada kadibna saxiix, kuna haggaajisaa xafiiska isdiiwaan gelinta ama emailka xisbiga, soona celiyaa kaarka aqoonsiga xisbiga.

2. Haddii xubinta ay gudan waydo waajibaadka iyo masuuliyada saarneyd.
3. Haddii la ogaado oo la soo caddeeyo innuu ka horyimid barnaamijka xisbiga, gudashada waajibkaadka go'aanka lagu eryaayo waxaa soo jeedinaya gudiyada xisbiga ayagoo soo raacinaayo warbixintiisa la xariirta xubinta.
4. Qofka kasta oo ka baxa xubinimada xisbiga waa innuu soo celiyaa dhammaan wixii hanti, qalab ama dhaqaalo ah ee xisbiga leeyahay haddii uu mas'uuliyaddaas haayay.
5. Waad ku waayi karkaa xubinimadaada haddii maxkamad ku xukuntay, qayaano qaran, argagixinimo, khalkhal amni, musuqmaasuq aad sameysay qabyaalad caddaalad daro, basaasnimo, haddii la ogaado inaad xisbi kale ka tirsan tahay ama aad la shaqeyso, haddii uu sameeyo sumcad wax u dhimayso xisbiga. Sidaas awgeed waa waajib inaad illaaliyo sirta, hantida iyo sumcada xisbiga.
6. Haddii xubnaha ama taageerayaasha xisbiga ay bixin waayaan qidmadda billaha ah ee loo baahnaa inay bixiyaan bilkasta waxaa laga saari doonaa diiwaanka xisbiga.

Qodobka 12aad

Qaab Dhismeedka Xisbiga Qaransoor

Qaab dhismeedka xisbiga wuxuu ka kooban yahay qodobadaan soo socda.

1. Shirweynaha xisbiga
2. Golaha Qaranka
3. Gudigga Fulinta
4. Gudigga Anshaxa
5. Gudigga Gobolada
6. Gudigga Degmooyinka iyo Dibadda
7. Guddiga Xalinta Khilaafaadka
8. Gudiga Racfaanka

Qodobka 13aad

Shirweynaha Xisbiga Qaransoor

Shirweynaha waa haay'adda ugu sareyso ee xisbiga Qaransoor, marka loo fiiryo sharci ahaan xagga awooda iyo falalka, haay'addaan waxay ka kooban tahay:

b. Xubnaha golayaasha qaranka.

t. Dhammaan xubnaha gobolada, degmooyinka iyo laamaha dibadda.

j. Tirada ergooyinka waxaa go'aan ka gaarayo Guddiga Fulinta.

x. Wakiilada qurbo joogtada.

Qodobka 14aad

Waajibaadka Shirweynaha

1. Shirwaynaha waxaa uu dooranayaa Hoggaamiye, Guddoomiye, Guddoomiya Ku xigeen, Xoghayaha guud iyo Ku xigeenka xoghayaha guud shantii sanaba mar.

2. Waxaa kale oo uu dooranayaa xubnaha Golaha Qaranka ee banaanada ama cusub ama wuxuu u wakiilanayaa cidda awood uu u siiyo.

3. Shirwaynuhu wuxuu ansixinayaa xeerka iyo barnaamijka hoggaaminta siyaasadeed ee Xisbiga iyo go'aanada ay usoo gudbiyaan Golaha Qaranka iyo gudiyada fulinta isaga oo habaynaya siyaasada guud ee Xisbiga.

4. Waxaa uu ka doodayaa warbixinaha loo soo gudbiyo iyo ajandayaasha loo soo diyaariyo isaga oo eegaya xaalada lagu horumarinayo hawlaha xisbiga, islamarkaana qiimaynaya warbixinaha loo soo gudbiyo, Waxaana uu go’aan ka soo saarayaa arimahaasi laga dooday.

5. Waxaa kale oo uu qiimaynayaa howlqabadkii gudida fulinta mudadii ay xilka haysay, wixii u qabsoomay, wixii qabsoomi waayay, sababta ay u qabsoomi wayday iyo sida loo xallinayo.

Qodobka 15aad

Golaha Qaranka

Golaha Qaranka ee Xisbiga Qaransoor wuxuu sameeyaa go’aanka shirweynaha qaran, sidoo kale wuxuu u xil saaran yahay arrimaha xisbiga inta u dhaxeyso kulamada shirarka, wadatashiga si ay u dardar geliyaan hawlaha xisbiga ee wakhtiga la taagan yahay.

1. Golaha Qaranka ee Xisbiga waxa uu ka kooban yahay 31 xubnood oo lagu ansaxiyey Shirweynaha iyo 10 Xubnood oo Shir weynaha awood u siiyey Hoggaamiyaha Xisbiga inuu soo magacaabo asigoo la tashanaayo Guddoomiyaha Xisbiga. Sidoo kale Golaha Qaranka waa hay’adda ugu sarraysa xisbiga inta u dhaxaysa labada shirwayne.
2. Liiska xubnaha Golaha Qaranka ee lagu ansixiyey shirweynaha waa in liiskooda oo dhameystiran la geeyaa Xafiiska Gudiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka mudo aan kabadnayn 25 maalmood maalinta shirweynuhu dhamaado.
3. Xubinta cusub waxa ansixinaaya Gudida Fulinta ee xisbiga waa inuu xoghaayaha golaha dhexe qoraal rasmi ah ugu gudbiyaa Xafiiska Gudida Doorashooyinka Qaranka.
4. Shuruudaha xubinta golaha qaranka waa,
    b. Inuu/inay buuxiso shuruudaha ku xusan qodobka 8aad ee xeerka xisbiga
    t. Kasoo jeedo saamiga heer gobol ama laan dibada ah
    j. Bixiyaa qaaraanka ku waajibay xubinta golaha qaranka bilkasta.
    x. Aqoon ahaan waa inuu yahay heer ilaa dugsi sare.

Kh. Mudo xileedka golaha waa 5 sano.

Qodobka 15aad

Hawlaha Golaha Qaranka

Hawlaha Golaha qaranka ee xisbigu waxay noqonayaan:

1. Golaha Qaranka waxa ay iska dhex dooranayaan saddex xubnood oo ah gudi hanti-dhawr oo u madax bannaan hawlahooda, islamarkaana toos ugu soo gudbin kara warbixintooda golaha qaranka.
2. Waxay ansixinayaan miisaaniyada xisbiga, waxaanay toosinayaan nidaamka maamulka, hoggaaminta siyaasada xisbiga iyo barnaamijyada siyaasada xisbiga lagu hoggaaminayo.
3. Waxay dhagaysanayaan warbixinaha ay usoo gudbiyaan Gudiga Fulintu waxayna qiimaynayaan waxqabadka gudiga iyo horumarka hawlaha xisbiga iyagoo ka doodaya arimahaasi isla markaana go'aan ka soo saaraya.
4. Golaha Qaranka wuxuu ku hagayaa Xisbiga istiraatijiyada siyaasadeed ee ku salaysan wada tashiga iyo horumarinta aayaha xisbiga iyadoo taladu ka imanayso xaga hoose una gudbaysa xaga sare.
5. Golaha Qaranka waxa uu kor joogtaynayaa hawlaha xisbiga waxaana uu dajin karaa nidaam casriya oo lagu maamulo hantida xisbiga, laguna hoggaamiyo hawlaha isla markaana waxa uu ka joojin karaa hawlaha cid-kasta oo ay ku caddaato inuu wax u dhimayo hawlaha xisbiga ama aanu si daacada u wadin hawlaha xisbiga.
6. Waxay iska dhex dooranayaan xoghayaha golaha qaranka iyo guddi-hoosaadyo. Guddi-hoosaad kastaana waxay iska dhex dooranayaan Guddoomiye, Gudoomiye ku xigeen iyo Xoghaaye.
7. Golaha qaranka waxa uu ansixinayaa heshiisyada dhexmara Xisbiga Qaransoor iyo xisbiyada kale oo ku saabsan iskaashiyo wax-wada qabsi oo la xirriira arrimaha siyaasada ee ay u soo gudbiyaan gudida fulintu iyaga oo ku ansixinaaya cod 2/3 ah.
8. Golaha qaranka waxa uu hubinayaa fulitaanka go’aamada hore loo ansixiyay iyo habka uu u fulay barnaamijka siyaasadeed ee xisbigu, waxaana uu tilmaamayaa habka ugu wanaagsan ee looga faa'iidaysanayo fursadaha soo mara xisbiga, islamarkaana waxa uu xallinayaa wixii khilaaf ah ee ku yimaada mas’uuliyiinta sare ee xisbiga.
9. Golaha Qaranka waxay u codaynayaan cidda noqonaysa musharraxa madaxwaynaha.
10. Haddii ay xubinta golaha qaranka ah ay ku timaado geeri ama uu ku waayo xubinimada sida ku xusan qodobka 8aad, waxaa soo magacaabaya xubinta lagu bedelayo laanta uu ka tirsanaa xubintaasi meesha ka baxday ka dibna waxaa ogolaanaya guddida fulinta waxaana ansixinaya kalfadhiga ugu horreeya ee golaha dhexe.

Qoddobka 16aad

Fadhiyada Golaha Qaranka

1. Fadhiga golaha qaranka ee caadiga ah waxaa la qabanayaa sanadkii mar, laga bilaabo maalintii uu xirmay fadhigii ugu danbeeyay.
2. Waqtiga la qabanayo fadhiga golaha qaranka waxaa cayimaya xoghaayaha golaha qaranka, waa in xoghaayaha golaha qaranka ku baahiyaa muddo aan ka badnayn 15 maalmood, haddii uu maqan yahayna waxaa muddadaa ku baahinaya ku-xigeenka xoghaayaha.
3. Haddii ay timaado duruuf ka dhigta lagama maarmaan in la qabto fadhi aan caadi ahayn waxaa soo jeedinaaya gudida fulinta oo ku ogolaanaya cod haldheeriya ama 1/3 golaha qaranka. Waxaana fadhigaa lagu qabanayaa mudo aan ka badnayn 15 maalmood.
4. Golaha Qaranka waxa uu yeelan karaa fadhiyo aan caadi ahayn ugu badnaan 2 jeer sanadkiiba.
5. Fadhiyada aan caadiga ahayn waxa ay ku qabsoomi karaan 50+ 1l xubnaha Golaha Qaranka. Fadhiyada golaha qaranka waxa ajandahooda soo diyaarinaaya xoghayaha golaha qaranka markuu la tashado hoggaanka sare ee xisbiga.

Qodobka 17aad

Golaha Fulinta

1. Golaha Fulinta waa haay’adda ugu sareyso ee socod siinta hawlaha xisbiga Qaransoor, waxay socod siisaa hawlaha xisbiga, waxayna ka kooban yahay 15 xubnood. Muddo xilleedka Golaha Fulinta waa 5 sano waxayna u bilaabanaysaa maalinta la doortay Gudigga Fulinta.
2. Golaha waxaa soo dhisaayo oo go’aan ka gaari karo Guddoomiyaha Xisbiga. Guddoomiyaha waxaa loogu baahan yahay inuu soo dhiso guddi ka kooban 15 xubnood. Sidoo kale guddiga waxaa kala diri kara isla guddoomiyaha asigoo la tashanaayo hoggaamiyaha xisbiga.
3. Fadhiyada caadiga ah ee Golaha Fulintu waxay noqonayaan bishiiba mar waxaana shir guddoonka noqonaaya gudoomiyaha xisbiga haddii uu maqanyahayna gudoomiye ku xigeenka, haddii uu maqanyahayna Xoghayaha Guud, haddii wax degdeg ahi ay yimaadaan waxaa isugu yeeraya Gudoomiyaha ama in kabadan kala bar xubnaha Gudiga Fulinta 10 cisho gudahood.
4. Golaha Fulintu waxa uu yeelanayaa gudi joogta ah oo ka kooban 3 xubnood oo ka kooban hoggaanka sare ee xisbiga iyo 2 xubnood oo kale oo uu gudiga iska dhex xulo.

Qodobka 18aad

Dhisida Golaha Fulinta

Golaha waxaa magacaabaayo Guddoomiyaha Xisbiga asigoo la tashanaayo hoggaanka xisbiga, sidoo kale wuxuu awood u leeyahay inuu ka casilo jagooyinkii uu magacaabay, laakiin waa in ay jirtaa sifo sharci sida inuu hawshiisa kasoo bixi waayo, anshax xumo iwm.

Qodobka 19

Xilalka Golaha Fulinta waxaa kamid ah:

1. Hoggaamiye
2. Guddoomiye
3. Guddoomiye Ku Xigeenka
4. Guddoomiyaha Dastuurka
5. Guddoomiye Ku Xigeenka Dastuurka
6. Xoghaayaha Guud
7. Xoghaayaha Xafiiska Diiwaan Gelinta
8. Xoghaayaha Madaxa Maaliyada
9. Ku Xigeenka Xoghaayaha Guud
10. Xoghaayaha Arrimaha Siyaasadda
11. Xoghaayaha Arrimaha Gudaha Federaalka, Gobolada iyo Degmooyinka
12. Xoghaayaha Arrimaha Dibidda
13. Xoghaayaha Haweenka & Caruurta
14. Xoghaayaha Dhalinyarada & Ciyaaraha
15. Xoghaayaha Wacyigelinta

Qodobka 20aad

Waajibaadka Golaha Fulinta

1. Golaha fulinta waxay ka masuul yihiin hirgalinta iyo horumarinta barnaamijka siyaasadeed iyo dhaqan gelinta xeerka xisbiga.

2. Fulinta go’aanada lagu ansixiyay shirwaynaha iyo fadhiyada Golaha Qaranka iyo socod siinta hawlaha Xisbiga.

3. Diyaarinta miisaaniyada xisbiga, ajandayaasha la hordhigayo fadhiyada Golaha Qaranka iyo warbixinaha la xiriira wax qabadka Gudiga Fulinta ee dhabta ah.

4. Gudiga Fulintu wuxuu ansixinayaan xilalka guddiyada gobollada, degmooyinka, laamaha, xoghayayaasha guddiyada fulinta iyo hawl wadeenada iyagoo la tashanaya taageerayaasha xisbiga ee deegaanada.

5. Golaha fulintu waxay u xil saaran yihiin abaabulka iyo wacyi galinta dadweynaha iyo hirgalinta hadafka siyaasaddeed ee xisbiga oo ah ismaamul iyo talo wadaag.

6. Golaha Fulinta waxay iska xilsaarayaan sidii loo horumarin lahaa adeegyada bulshada iyada oo lala kaashanayo kaalmo dibadeed iyo hayadaha samafalka, iyaga oo dhawraya danaha guud, islamarkaana haya'dahaas u fududaynaya helitaanka khubaro waddani ah ama caalami ah.

7. Xubnaha Golaha Fulinta waxaa waajib ku ah inay u gutaan si daacadnimo iyo isxilqaan ah hawsha loo xilsaaray, isla markaana dhawraan wada shaqaynta iyo xiriirka xubnaha kale iyo bulshadaba.

9. Waxay ansixinayaan oo go'aaminayaan xubnaha xisbiga ka galaya golayaasha qaranka iyagoo la tashanaaya xaruma gobolada, degmooyinka iyo laamaha.

Qodobka 21aad

Hoggaamiyaha Xisbiga

1. Hogaamiyaha xisbiga waxa dooranaya Shirwaynha Xisbiga.

2. Hoggaamiyaha waa qofka u tartamaayo Madaxweynaha dalka, waxa uu guddoominayaa shirwaynaha iyo fadhiyada golaha qaranka.

3. Wuxuu masuul ka yahay diyaarinta hindise hoggaamineed ka, qorshaha istiraatiijiga ah ee lagu balaarinayo taageerayaasha xisbiga heer federaal, gobol, degmooyin iyo laamaha dibidda.

4. Wuxuu baadigoobayaa taageerada maadiga iyo tan macnawiga ah ee xisbiga

5. Wuxuu bidhaaminayaa hiraalada fog iyo hiigsiga xisbiga, wuxuuna saxiixaa heshiisyada iyo qoraalada rasmiga ah ee xisbiga.

6. Waxa uu magaca xisbiga ku saxiixi karaa heshiisyada dhexmara xisbiga iyo xisbiyada kale ka dib marka ay Golaha Fulinta ku ogolaato cod haldheeriya ah, dabadeed waxaa la hor keenayaa fadhiga ugu horeeya ee Galaha Qaranka.

7. Wuxuu ku hadlaa magaca xisbiga kagana qayb gali karaa shirarka gudaha iyo dibada isaga oo aan ku xadgudbayn xeerka iyo barnaamijka xisbiga.

Qoddobka 22aad

Shuruudaha Hoggaamiyaha Xisbiga

1. Qof kasta oo u tartamaya Hoggaaminta Xisbiga waa in uu buuxiyaa shuruudahan:

b) In uu yahay xubin xisbiga ka tirsan islamarkaana buuxiya shuruudaha xubinimada.

t) In aan da'diisu ka yarayn 30 sano jir.

j) In aqoontiisu gaarsiisan tahay heer jaamacadeed

x) In uu xisbiga ka tirsanadaa ugu yaraan labo sano

2. Qofna looma dooran karo hoggaamiyaha xisbiga wax ka badan sedex jeer.

3. Jagada hoggaamiyaha waxa ay ku banaannaan kartaa:.

I. Haddii ay hoggaamiyaha ku timaado geeri.
II. Haddii ay burto mid ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay iyada oo ay ka go'aan gaarayaan 2/5 xubnaha golaha qaranka iyo guddoomiyaha 1aad xisbiga.
III. Haddii uu iscasilo golaha qarankana ka aqbalo ama xilka looga qaado si xeerka waafaqsan.

Qoddobka 23aad

Guddoomiyaha Xisbiga

1. Guddoomiyuhu waxa uu socodsiiyaa hawl maalmeedka xisbiga.
2. Gudoomiyuhu waxa uu ka soo jeediyaa shirwaynaha iyo fadhiyada golaha qaranka warbixino, tala bixino ku saabsan siyaasada iyo qorshaha hawlaha xisbiga.
3. Guddoomiyuhu waxa uu xisbiga ku haggaa xeerka iyo barnaamijka siyaasada ee loo jaan gooyay.
4. Guddoomiyuhu waxa uu magacaabayaa gudiga qabanqaabada shirweynaha waxaana ogolaanaya golaha fulinta.

Qoddobka 23aad

Guddoomiye Ku Xigeenada Xisbiga

1. Xisbiga Qaransoor waxa uu yeelanayaa Gudoomiye ku xigeen waxaana dooranaya golaha qaranka.
2. Shuruudaha Gudoomiye ku Xigeenka waxa ay la mid yihiin kuwa Gudoomiyaha.
3. Wuxuu qabanayaan hawlkasta oo uu u igmado gudoomiyaha gudiga fulinta waxaanay ka caawinayaan socodsiinta hawlaha xisbiga.
4. Marka uu maqan yahay gudoomiyuhu waxa uu hawshiisa u sii igmanayaa gudoomiye ku xigeenka oo fulinaaya hawlihii looga baahnaa oo dhan, haddii isagu uu maqanyahay waxaa hawsha sii qabanaya xoghaayaha guud.

Qoddobka 24aad

Xoghayaha Guud iyo Ku Xigeenkiisa

1. Xoghaayaha guud ee xisbiga iyo ku xiggeenkiisa waxaa dooranaya golaha qaranka.
2. Xoghayaha guud waxa uu masuul ka yahay socod siinta maamulka xisbiga guud ahaan.
3. Waxa uu diyaarinayaa qoraalada warbixinada, miisaaniyada, ajandayaasha lagaga doodayo fadhiyada golaha fulinta, golaha qaranka iyo shirwaynaha.

4. Xoghaayaha guud waxa uu masuul ka yahay dabagalka fulinta go'aamada la ansixiyay iyo hirgalinta barnaamijyada siyaasada, isaga oo la kaashanaya xoghayaha ka masuulka ah hawshaas.
5. Xoghayaha guud waxa uu maamulayaa shaqaalaha xisaabaadka isla markaana waxa uu habaynayaa oo uu kaydinayaa dhukumentiyada xisbiga, waxaana uu diiwaan-gelinayaa oo uu ilaalinayaa hantida xisbiga.
6. Xoghaayaha guud waxa uu madax u yahay xoghayayaasha kale ee golaha fulinta waxaana uu ku kormeerayaa habsami u socodka hawlaha ay ka masuulka yihiin.
7. Xoghayaha guud waxa uu qabanayaa hawshii kale ee uu u xilsaaro guddoomiyaha iyo hoggaamiyaha Xisbiga.

Qoddobka 25aad

Musharixiinta Golayaasha Sharci Dejinta iyo Deegaanka

1. Qof kasta oo u tartamaya golayaasha sharci dejinta ama deegaanka waa in uu buuxiyaa shuruUdaha hoos ku xusan:

   b) Inuu yahay xubin xisbiga ka tirsan oo buuxiyaya shuruudaha xubinimo, bixiyana qaaraanka Xisbiga

   t) Inuu buuxiyo/buuxiso shuruudaha xeeerarka dalku uga baahan yihiin.

   j) Inuu yahay ruux aaminsan barnaamijka xisbiga.

   x) Inuu bixiyo lacagta deebaajiga ah aay go'aamiyaan golaha fulinta ee Xisbiga.

Qoddobka 26aad

Qaybaha Xisbiga

1. Gobol kastaa wuxuu yeelanayaa gudi joogta ah oo ka kooban 15 xubnood, gudidaasi waxay yeelanaysaa gudoomiye iyo gudoomiye xigeen, xoghaaye iyo xubnaha kale oo ka mid noqonaya hawl wadeenada xisbiga.
2. Xoghaayaha gobolku waa in uu noqdaa xubin ka tirsan Golaha Qaranka ee Xisbiga.
3. Gudoomiyaha, Gudoomiye ku-xigeenka iyo Xoghayaha gobolka waxaa magacaabaya Gudoomiyaha Xisbiga markuu la tashado Golaha Fulinta.
4. Degmo kastaana waxay yeelanaysaa gudi joogta ah oo ka kooban shan xubnood oo yeelanaya gudoomiye, gudoomiye xigeen iyo xoghaaye iyo xubnaha kale oo noqonaaya hawl wadeenada xisbiga ee degmada.
5. Gudoomiyaha, gudoomiye-xigeenka iyo xoghaayaha degmada waxa magacaabaya Gudoomiyaha gobolka markuu la tashada gudida joogtada ah ee gobolka.

6. Tuulooyinka iyo xaafadaha waxay yeelanayaan gudi joogta ah oo ka kooban Sedex xubnood oo yeelanaya guddoomiye, guddoomiye xigeen iyo xoghaaye. Sadexdan masuul ee ugu sareeya tuulada ama xaafadda waxa magacaabaya gudoomiyaha degmada aay hoos timaado.
7. Laamaha dibidda xisbiga wuxuu ku yeelanayaa wakiilo, waxaana loo aqoonsanayaa heer degmo ama laan iyadoo loo eegayo baaxadda jaaliyadda Soomaaliyeed ee deggen meeshaas, waxaana lagu kala saarayaa taageerayaasha xisbiga ee bixiya qaaraanka xisbiga.
8. Madaxda wakiilada xisbiga ee debeda waxa magacaabaya Gudoomiyaha Xisbig marka uu la tashado Golaha Fulinta.

Qoddobka 27aad

Hawlaha Guddiyada Xisbiga

1. Fulinta barnaamijka siyaasada ee xisbiga.
2. Diiwaan galinta xubnaha raba inay ka mid noqdaan xisbiga.
3. Abaabulka iyo wacyi galinta dadweynaha.
4. Xiriirka iyo wada tashiga xafiisyada xisbiga ee tuulooyinka, laamaha dibada, degmooyinka, gobollada iyo xarunta guud, iyada oo taladu min tuulooyinka ilaa xarunta guud ee xisbiga ay ku dhisan tahay hab ku dhisan nidaam dimuqraadi ah.

Qoddobka 28aad

Guddida Anshaxa

1. Kalfadhiga ugu horeeya ee golaha dhexe yeesho shirweynaha kadib waa in lagu sameeyaa gudi anshax oo heer qaran

b) Tirada gudida anshaxu heer qaran waa in ay noqotaa todobo xubnood

t) Gobol waliba waxa uu yeelanayaa gudi anshax oo ka kooban 5 xubnood oo aay sameeyeen Gudida heer gobol

2. Muddada Gudiga Anshaxu heer qaran waa 6 sano oo ka bilaabmaya maalinta la doorto.

3. Gudigu wuxuu awood u leeyahay in ay talaab anshax marin ka qaadan xubinta ay ku helaan eedaha, waxayna iyaga oo eegaya culayska gefka xubintu gashay qaadayaan talaabooyinka soo socda;-

b) Waxay u gudbinayaan qoraal canaan

t) Waxay siinayaan fursad uu isku difaaco

j) Waxay ku wargelinayaan gefka loo haysto mudo 10 cisho ka hor inta aan talaab laga qaadin

x) Waxay ku qaadi karaan hadba inta uu gefka la egyahay

kh. Xil ka qaadis ama shaqo ka fariisin mudo aan 10 illaa 15 ka badnayn.

d. Ganaax lacageed oo u dhexeeysa una dhiganta $100 ilaa $1000

r. Eryid ama talaabo kasta oo kale oo ku habboonaata

5. Muddada Gudiga Anshaxu heer qaran waa afar sano oo ka bilaabmaya maalinta la doorto.

Qoddobka 29aad

Falalka Anshax Marinta

1. Xubin kasta ee Xsibiga ka tirsan haddii uu la yimaado xadgudub anshax marin waxaa anshax marinaya Gudiga Anshaxa heer Qaran ama Gobol.

2. Falalka keeni kara anshax marin waa haddii uu

a) Ku gafa xeerka xisbiga.

b) Ka horyimaada mabaadiida siyaasadeed ee Xisbiga u degsan.

c) Gudbisa sir xisbigu leeyahay.

d) Lunsata dhaqaale xisbigu leeyahay

Qodobka 30aad

Wajibaadka Guddiga Anshax-marinta

1. In aay go'aan ka gaaraan eedeynta ashax daro, xad gudub ku saabsan dastuurka xisbiga, hab-raaca howl fulinta, wax u dhimid ama ka hor imaansho siyaasadda xisbiga.

2. In aay go'aan ka gaaraan eedeynta la xariirta si xun u isticmaalka daqliga xisbiga.

3. In aay go'aan ka gaaraan eedeynta anshaxa daro ee la xariirta ka bixin turjimaad qaldan iyo u hogansanan la'aan shuruucda iyo xeerarka xisbiga.

4. Haddii ay timaado hanjabaad ku wajahan xubin ama xubno katirsan xisbiga ama xisbi kale, guddigu waa inuu ciidamada amniga qoraal ku wargeliyaa.

Qodobka 31aad

Habraaca dacwad Qaadista

1. Guddigu wuxuu dhagaysanayaa dacwadda.

2. Xoghayaha guddiga wuxuu qaadayaa qoraalka dacwada.

3. Dacwad qoraalkaas waa in uu u diyaariyaa si faahfaahsan isagoo tilmaamaya eedeymaha lasoo jeediyay iyo sababaha la xiriira.

4. Xoghayaha waa in qoraalka ku muujiyaa dambiga la sheegay in la galay iyo qodobada dastuurka, xeerarka, xeer hoosaadyada iyo hab dhaqan wanaagga la jabiyay.

5. Ka hor intaan dhagaysiga dacwada bilaabmin muddo shan maalmood gudahood ama ka yar haddii arrintu deg deg tahay, waa in qareenka ama eedeysanaha lagu siiyaa qaab qoral iyo codba ah eedeymaha lagu haysto, islamarkaana laga saxiixaa.

6. Guddigu markuu helo dhammaan qoraalaada iyo xogta dacwada wuxuu muddo kooban oo aan ka badnayn labo todobaad isugu yeeraa dhamaan cidii ay dacwaddu qusaaysay si loo dhagaysto dacwadaas.

7. Haddii loo baahdo, guddigu waa inuu goobta dacwada lagu qaadayo keenaa xeel-dheerayaal taqasus u leh afka calaamadaha dadka aan wax maqlin iyo kuwa uu hadalka ku adag yahay.

8. Shaqsiyadka soo socda waa inay joogaan, waxayna ku biiran karaan wixii lagama maarmaan ah, xilliga dhageysiga anshaxa.

i. Xubna ka mid ah guddiga

ii. Dacwad qabaha.

iii. La dacweeyaha

iv. Qareenka, turjumaha, xeel-dheere taqasus u leh midaarka (sign language) dadka maqalkoodu dhiman yahay haddii ay jiraan

v. Ugu badnaan shan markhaati dhinac kasta.

Qodobka 32aad

Waajibaadka Guddomiyaha gudiga anshaxa

1. Guddoomiyaha guddiga waa in uu hubiyaa in ay:-

a. Dhageysiga Dacwadda anshax-darrada in aay si caddaalad ah u dhacday.

b. Waa inuu hubiyaa habsami u dhicidda dacwadda, waana inuu go’aan xukun ka soo saaraa dacwadaha horyaalla.

c. Waa inuu hubiyo in eedeysanaha la ogeysiyay eedda loo heysto iyo in la wadiiyay inuu qirto ama diido.

d. Dacwad qabahu wuxuu faahfaahinaya xad gudbka loo geystay, wuxuuna u yeeran karaa markhaatiyo, iyo qoraallo, iyo caddaymo kasta oo la xiriira dacwadiisa.

e. Eedeysanahu wuxuu u yeeranayaa qareen difaaca wuxuuna su’aalo waydiin karaa markhaatiyada goobta la keenay, wuxuuna keeni karaa qoraallo iyo caddaymo kasta oo la xiriira dacwadda loo haysto.

f. Wuxuu hubinayaa in qoraallada dacwadda xoghayahu si fican loo qaado una kaydiyo.

Qaabka Go'aan gaarista Guddiga Anshaxa

1. Kulanka guddigu wuxuu ku guntamayaa aqlabiyad hal dheeri xubnaha guddiga.

2. Go'aannada waxaa lagu garayaa is af garad (consensus). Hadday suurta geliwaydo is afgarshadu, waxaa lagu kala baxayaa cod aqlabiyad hal dheeri ah. Hadday dhacdo in codku sinmo, gudoomiyaha ayaa codeynaya.

Qodobka 33aad

Go'aanadda Guddiga Anshax marinta

1. Markii ay dhammaato dhageeysiga dacwaddu, guddigu wuxuu gelayaa kulan gaar ah wuxuuna ka wada hadlayaa aadna u falanqeynayaa dacwadii uu dhegeystey, wuxuuna ka soo saarayaa go'aan noqon kara: -

I. In la waayay caddaymo ku filan oo la xiriira eedaha lasoo jeediyay.

II. Ganaax lacageed ama shaqo lacag la aan ah oo uu ka qabto/ ka qabato xisbiga gudihiisa.

III. Laalid xubin nimadiisa/xubinnimadeeda xisbiga.

IV. Ka saarid xisbiga.

V. Eedeysanaha waxaa la ogeysinayaa xukunka iyo ciqaabta guddiga anshaxa iyo sababaha keenay waxaana la ogeysinayaa xaqa uu u leyahay inuu racfaan qato.

VI. Xukunka guddiga anshaxa waxaa loo aqrinayaa dhinacyada.

Qodobka 34aad

Dhisida Guddiga Xalin Khilaafaadka

1. Kalfadhiga ugu horeeyo ee golaha qaranka xisbiga waxaa in lagu doortaa Guddiga Xalinta Khilafaadka oo heer qaran.
   B) tirada guddida xalinta khilafaadka waa in ay noqotaa 9 xubnood
   T) Gobol waliba waxa uu yeelanayaa gudi anshax oo ka kooban 5 xubnood oo ay sameeyeen guddiga heer gobol.
   J) mudo xilleedka waa 6 sano oo hal xili ah.

Qodbka 35aad

Waajibaadka Guddiga Xallinta Khilafadka Xisbiga Gudihiisa

1. Guddiga xallinta khilaafaadka Waxay dhiira galinaysaa wada jirka iyo midnimada xubnaha xisbiga dhexdiisa.

2. Guddiga xallinta khilaafaadka waxaay go'aan ka gaareysaa: -

a. Khilaafaadka u dhaxeeya xubnaha xisbiga.

b. Khilaafadka u dhaxeeyo xubnaha iyo xisbigooda.

c. Murunka ka dhasha magacaabidda murashaxiinta dorashada ka hor.

d. Muranka ka dhasha doorashada ama magaacabista hawlwadeenada xafiisyadda xisbiga.

e. Muranka ka dhasha qeybsiga xilalka la'isu magacaabo doorashada kadib.

f. Muranka ka dhasha maamulidda maaliyadda iyo hantida kale ee xisbiga.

g. Murunka ka dhasha maamulidda arrimaha xisbiga.

Qodobka 36aad

Habraaca Xalinta Khilaafaadka Guddiga

1. Khilaafadka ka dhasha magacabista musharixiinta doorashooyinka waa in la soo gudbiyaa afar iyo labatan saac kadib markii la shaaciyay musharixiinta.

2. Wixii kale ee qilaaf ah oo aan ka aheen magacaabista musharixiinta doorashooyinka waa in la diiwaangaliyaa soddan maalmood gudahood.

3. Waxaa khasab ah in cabashadu: -

a. Ay ahato mid qoraal ah ama oraah marqaati fur ah oo uu

b. Diiwaangeliyaa xoghayuhu.

c. Waa in ay cad yihiin sababaha khilaafku oo ay u qoran yihiin si

d. Faahfahsan oo la fahmi karo.

e. In aay cadeysaa khilaafka, qodobada dastuurka, shuruucda, xeer hoosaadyada iyo hab dhaqanka la khilaafay.

f. Marka cabashadu la xiriirto musharixiinta doorashoyinka, la eedeyaha waa in lagu gaarsiiyaa cabashadaas afar iyo labatan sacadood gudahood, cabasho kasta ee taa ka duwan la eedayaha waxaa lagu gaarsiinayaa sodon maalmood gudahood.

g. Waa inuu saxiixo dacwad qabuhu.

4. Guddiga xallinta khilaafaadka guduhu waxay u yerayaan dhinacyada khilaafku dhaxyaallo waqti munaasab ah oo aan ka badnayn afar iyo toban maalmood gudahood, waxayna ogeysineyaan in ay xaq u leeyihiin inay qabsan karaan qareen u dooda ama xubno xisbiga ka tirsan oo matali kara una doodi kara. Sidoo kale waxay keeni karaan markhaatiyaal.

5. Haddii loo baahdo guddiga xallinta khilaafaadka guduhu wuxuu keeneyaa turjubaanno, xeel-dheerayaal taqasus u leh afka calaamadaha dadka aan wax maqlin iyo kuwa uu hadalka ku adag yahay.

6. Shaqsiyaadkaan soo socodo waa in aay jogaan goobta dacwad qadista:-

i. Xubnaha guddiga dacwada qaadaya

ii. Dacwad qabaha.

iii. Eedeysanaha;

iv. Turjubaanno, xeel-dheerayaal taqasus u leh afka calaamadaha dadka aan wax maqlin iyo kuwa uu ku adag yahay haddii loo baahdo.

v. Markhaatiyaal.

Qosdobka 37aad

Waajibaadka Gudoomiyah guddiga

1. Gudoomiyaha guddiga xallinta khilaadaaka waa in uu hubiyaa: -

I. In qaabka dacwad qaadistu noqoto mid cadaalad ku salaysan.

II. In uu go'aan ka gaaro arrin kasta oo dacwada lagu soo qaaday.

III. In uu hubiyo in eedeysanaha la gaarsiiyay dacwada laga keenay.

IV. In dacwad qabahu uu faahfaahiyo eedeymaha uu soo jeedinayo, uuna keeno cadeymo iyo markhaatiyaal.

V. Eedeysanaha wuxuu keenayaa qareen u dooda, kaas oo su'aalo weydiin kara markhaatiyaasha goobta la keenay wuxuuna soo bandhigi kara xog uu ku burinayo dacwadda.

VI. In uu hubiyo in xoghayuhu wada qoray, diiwangeliyay, keydiyayna dhamaan xogtii dacwaddaas la dhageytay.

2. Markii uu dhamaado dhageysigaa xallinta khilaafadka gudomiyaha guddiga xallinta khilaafaadka wuxu hubinayaa:

I. In Xubnaha guddigu ay dhageystaan ayna tixgaliyaan arrimaha lagu soo qaaday dacwadda, markaasna go'aan xaqiiqada ku dhisan ka gaaraya ama tala bixin ka soo jeedinaya.

II. In eedeysanaha la ogeysinayo xukunka iyo amaradda guddiga oo sababaysan, sidoo kale waxaa la ogeysinayaa in uu xaq u leyahay inuu ka qaadan karo racfaan.

III. In Xukunka iyo amarrada loo aqrinayay dhinacyada.

Qodobka 38aad

Qaabka Go'aan gaarista Guddiga Xalinta Khilaafaadka

1. Kulanka guddigu wuxuu ku guntamayaa aqlabiyad hal dheeri xubnaha guddiga.

2. Go’aannada waxaa lagu garayaa is af garad (consensus). Hadday suurta geliwaydo is afgarshadu, waxaa lagu kala baxayaa cod aqlabiyad hal dheeri ah. Hadday dhacdo in codku sinmo, gudoomiyaha ayaa codeynaya.

Qodobka 39aad

Dhisida Guddiga Racfaanka

1. Guddiga racfaanka waxaa dhisaayo golaha qaranka ee xisbiga.
   B) tirada xubnaha waa 9 xubnood.
   T) mudo xileedka guddiga waa 6 sano oo hal xili ah.

Qodobka 40aad

Hab-Raaca Racfaanka

1. Racfaan waxaa keeni karaa: -

i. Eedeysane ay go’aan ka gaartay ama ay xukuntay guddiga xallinta

ii. Khilaafaadka gudaha ama Guddiga Anshaxa

iii. Dacwad qabe, cabasho u geeyay guddiga xallinta khilaafaadka

iv. Gudaha ama Guddiga Anshaxa.

2. Dhageysiga racfaanka waxaa qaadaya guddiga racfaanka.

3. Guddiga racfaanku waa mesha ugu danbeyso oo loo qaadan karo racfaan xisbiga guduhiisa.

4. Racfaanka waa in: -

i. Lagu qaataa afar iyo toban maalmood gudahood kana bilaabmaysa

ii. Markii lagu wargeliyay go’aanka xukunka.

iii. Waa in uu noqdaa orah ama qoraal uu diyaariyay xoghayuhu.

iv. Waa in la cadeyaa sababo faahfaahsan oo run ku salaysan

v. In loo gudbiyaa Racfaanlaha afar iyo toban maalmood gudahood ka hor dhageysiga racfaanka ama waqti intaa yar haddii arrintu deg deg tahay.

5. Markii laga reebo xaalado khaas ah oo uu go'aamiyay gudoomiyaha guddiga racfaanka ee dhageysanaya racfaankaas, xog cusub lama soo bandhigi karo lamana tixgelinkaro marka dib loo dhageysanayo racfaankaas.

6. Eedeymo cusub lama keeni karo waqtiga racfaanka.

7. Guddomiyaha iyo xubnaha guddiga rafcaanka waa in aay tixgaliyaan arimaha lagu soo qaaday dhageysiga racfaankan, waana in aay go'aan ka garaan ayagoo ku salaynaya xogaha iyo caddeymaha loo soo gudbiyay dhageysiga racfaankan, kaas oo noqon kara mid waafaqsan ama ka duwan go'aankii hore.

8. Qofka racfaanka soo qaatay in loo sheego xukunka guddiga racfaanka, in guddiga racfaanka ku raacay iyo inuu xukunkii hore ama ciqaabihii hore wax ka badalay.

9. Dacwad qabaha iyo eedeysanuhu waxay xaq u leeyihin in aay racfaan ka qataan go'aanka guddiga racfaanka una gudbiyaan Maxkamadda awooda u leh.

Qodobka 41aad

Guddiga Racfaanka

1. Haddii ay dhacdo go'aanka ay gaareen guddiga khilafaadka lagu qanacsanaani waayo waxaa laga qaadan karaa racfaan.
2. In fursad kale la siiyo qofka racfaanka qaatay.

Qodobka 42aad

Dowrka Haweenka iyo Dadka laga tirada badan yahey

1. Xisbiga Qaransoor wuxuu aaminsan yahay in haweenku lafdhabar u yihiin guud ahaan hawlaha siyaasada, gaar ahaan kuwa xisbiga la'aantood aan la dhaqaaqi karin, ayadoo xoog weyn lagu bixinayo in haweenku kaalin hoggaamineed ka qaataan siyaasada dalka.

2. Xisbigu wuxuu taageero dhinac kasta ah siinayaa ururada haweenka iyo kuwa bulshada rayidka ah ee ay dumarku hoggaamiyaan ee ka shaqeynaya horumarinta dumarka iyo illaalinta dhaqanka wanaagsan ee haweenka Soomaaliyeed ay xambaarsan yihiin.

3. Xisbiga Qaransoor waxey u tahay mabda' illaalinta Ururada Haweenka Soomaaliyeed iyo Dadka deegaamo looga tira badan yahay deggan, ayadoo qeybahaas tixgalin gaar laga siinayo hawl wadeenada iyo shaqaalaha xisbiga dhexdiisa.

4. Waxey yeelanayaan qoondo ahaan Saamiga 35% Shaqaalaha iyo hawl waddeenada xisbiga iyo Golayaasha.

Qodobka 43aad

Xafiiska Mutadawiciinta, Shaqaalaha iyo Hawl Wadeenada Xisbiga.

1. Xisbigu wuxuu yeelanayaa Xafiis qaabilsan mutadawiciinta diyaarka ah, Shaqaalaha iyo hawlwadeenada Xisbiga.

2. Xafiiskani wuxuu si toos ah u hoos imaanayaa Xoghayaha Guud ee Xisbiga.

3. Shaqaalaha & mutadawiciinta diyaarka ah waxaa soo diyaarinaya saraakiisha Xafiiska, marka ogolaansho iyo baahi ay ka timaado Xafiiska Xoghaayaha Guud ee Xisbiga.

4. Shaqaalaha iyo hawlwadeenada Xisbigu ma xadidna ee waa hadba baahidu shaqo inta ay la egtahey.

5. Xafiiska shaqaalaha iyo hawlwadeenada Xisbiga wuxuu dhawrayaa kaalinta Haweenka iyo Dadka deegaamo looga tira badan yahay deggan, sidoa kale xeerka Shaqaalaha Rayidka ah iyo sharciyada Dalka u Deggan.

6. Siyaasaadka Xisbiga ee shaqaala qaadashada & hanaanka loo maraayo waxaa golaha fulinta xisbigu ka soo saarayaa xeer gaar ah, kaasoo dhaqangal noqon doono marka uu ansixiyo golaha qaranka.

b) Xisbigu wuxuu ku biiri karaa Xisbi, Xisbiyo ama Isbaheysi Xisbiyo kale, waxayna ku imaan kartaa xaaladaha soo socda:

1) Xisbiga oo u baahda aqlibiyad kuraas Baarlamaan, si uu xukuumad u soo dhiso.

2) Xisbiga oo u arka in uu u baahan yahey isbaheysi si loo meel mariyo aragtiyada iyo himilada siyaasadeed ee uusan keligii ku filneyn.

3) Haddii uu xisbigu waayo ama arko in uusan heysan xubno ku fillan si uu u noqdo xisbi kumeel gaarka ka gudba oo u gudba xisbi rasmi ah.

4) Dhamaan qodobada ku xusan xarafka

(b) ee Isla qodobkan waxaa soo jeedin kara hoggaanka sare ee xisbiga ama ugu yaraan 5 xubnood oo xilal muhiim ah u haya xisbiga kana mid ah Golaha Fulinta.

5) Dhamaan soo jeedinta qodobadaan waxaa ansixinaya iskuna raacaya xubnaha Golaha Fulinta 5 Meelood 3, ayadoo go'aankaas loo gudbinayo golaha qaranka si uu u ansixiyo.

Qodobka 44aad

Saxiixa Idman ee Saraakiisha Xisbiga

1. Dukumiintiyada lagu wareejinayo xafiiska diiwaangeliyaha sida diiwaanka xubnaha, warbixinada, heshiiska la midowga xisbi ama xisbiyo kale iyo isbahaysi kasta oo siyaasadeed.

2. Maaliyadda iyo xisaabaadka bangiga ee xisbiga.
3. Xisaab xir sanadeedka iyo dhaqdhaqaaqa lacageed ee xisbiga.
4. Warbaxin ama dokumiinti kasta ee uu xisbiga ku waajibinaayo sharcigan ama shuruucda kale ee dalka.
5. Shahaadada magacaabis kasta ama doorasho xubin ka mid ah xisbiga.
6. Saxiixyada idman ee dokumentiyada xisbiga waxaa saxiixaayo Guddoomiyaha, Hoggaamiyaha ama Xoghaayaha guud.

Qodobka 45aad

Dokumentiyada Siyaasadeed ee Xisbigu Soo Saaro

1. Dokumentiyada siyaasadeed ee xisbigu soo saaro waxey lahaanayaan tirsi, tixraac iyo taariikh.
2. Dokumenti kasta oo siyaasadeed waa in uu lahaado saxiixa Guddomiyaha Xisbiga ama Hoggaamiyaha xisbiga iyo Xoghaayaha Guud ee Xisbiga.

3. Uruurinta, ilaalinta & diyaarinta Documentiyada siyaasadeed ee xisbigu soo saaro waxaa u xilsaaran xoghaayaha guud ee xisbiga.

4. Dokumentiyadaasi waxay noqonayaan

a) Dokumiintiga sanad laha ah ee Golaha Fulinta

b) Dokumiintiga sanadlaha ah ee Golaha Qaranka

c) Dukumeentiga sanadlaha ah ee xisaab celinta xisbiga

d) Dokumiintiyada heshiisyada siyaasadeed

e) Qoraalada rasmiga ah ee xisbiga

Qodobka 46aad

Maamulka, Maaliyadda & Hantida xisbiga Dakhliga & Kharashka

1. Xisbig Qaransoor hantidiisa guurtada ah iyo ma guurtaba waxaa u xilsaaran Hanti Dhawrka Xisbiga.

2. Gudiga hanti dhawrka waxay ka kooban tahay 5 xubnood oo Golaha Qaranka iska soo dhexdoortaan oo u madax banaan shaqadooda.

3. Guddigaasi waxay toos u baari karaan dhamaan xafiisyada xisbiga iyo hantida xisbiga waxayna warbixin toosa u gudbin karaan Golaha Qaranka waxayna toosin karaan maamulka xisaabaha ee Xisbiga.

4. Gudigaasi waxay hubbinayaan dhammaan hantida xisbiga haddii ay tahay guurto iyo ma-guurtaba.

5. Guddidaasi waxay shaqada ka joojin karaan haddii ay la kulmaan cid si khaldan ugu tagrifashay hantida xisbiga, iyaga oo la socodsiinaya madaxda ka sarraysa haddii ay u caddaato in lagu tagri falay hantida xisbiga waxay u gudbin karaan Golaha Qaranka oo go'aan ka gaaraya.

Qodobka 47aad

Dakhliga Xsibiga

Dakhliga xisbiga waxa uu ka imaanayaa:

1) Qaaraanka ay bixiyaan xubnaha xisbiga qaab 3 biloodle ahna loo hormarinayo.
2) Maalgashi uu xisbiga sameeyey.
3) Deeq aan shardi ku xirnayn.
4) Sadaqada iyo kaalmada xubnaha xisbiga
5) Iyo meelo kale haddii aysan shuruucda dalka ka hor imaanaynin.

Kharashka & xisaabaadka xisbiga:

1) Xisbigu wuxuu yeelanayaa ku tala-gal miisaaniyad sanadeed dakhli iyo kharash isugu dheeli tiran.
2) Waxaa kaloo yeelanayaa xisaab-xir sanadeed dakhli iyo kharash ah.
3) Diiwaanka guud ee hantida guurtada iyo maguurtada ee xisbiga.

Xisbigu waxa uu yeelan karaa hanti guurto ah ama ma guurto ah. Hantidaasina wax ay ka iman kartaa:

b. Kaalmada ay xukuumadu si siman u siiso Xisbiyada Qaranka.

t. Khidmada ama fiiga ay bixiyaan musharixiinta golayaasha qaranka u tartamaya.

j. Qaaraanka ay bixiyaan xildhibaanada xisbiga usoo baxaa.

x. Faahfaahinta maaliyadda xisbigu waxay ku soo baxeysaa xeer hoosaadka maaliyadda .

Qodobka 48aad

Habka Maamulka iyo Maareynta Hantida Xisbiga

1. Xisaab-xir Sanadeedka iyo dhaqdhaqaaqa xisaabta xisbiga waxaa u xilsaaran waxna laga weydiinayaa Xoghaayaha Maaliyadda iyo Xisaabyaha Guud ee Xisbiga, iyadoo uu markasta xog ogaal u noqonayo xoghaayaha guud ee xisbigu si uu ula wadaago hoggaanka xisbiga iyo Golayaashiisa.

2. Warbixinada la xiriira xisaabaadka xisbiga haddii ay soo dalbadaan haay'ado ka baxsan Xisbiga waxaa la ogeysiinayaa Hoggaamiyaha Xisbiga, Gudoomiyaha iyo Xoghaayaha Guud ee Xisbiga, ogalaanshiyahooda ayaana lagu bixinayaa.

Qodobka 49aad

Baabi'inta Xisbiga iyo Hantidiisa

1. Haddii xisbiga ay soo waajahdo duruufo uu ku shaqayn waayey sida

b) Hanti La'aan,

t) Khilaaf soo noq-noqda oo xal kama danbeys ah loo waayo

j) Waxyaabihii kale ee caqabad ku noqda socodsiinta hawlaha xisbiga oo laga maarmaan ka dhigaya burburka xisbiga.

Qoodbka 50aad

Meel ku Ogaanshaha Hantida xisbiga

1. Marka uu xisbigu baaba'o, isagoon talada qaranka hayn, hantida xisbiga waxaa lagu wareejinayaa qaranka, waana hanti qaran.
2. Haddii sidoo kale uu xisbigu baaba'o isaga oo talada qaranka haaya hantida xisbiga waxay noqoneysaa hanti qaran.

Qodobka 51aad

Hab-raaca Loo Baabi'inayo Xisbiga

1. Golaha Qaranka ayaa loogu baahan yahay marka horre inay ka doodaan qodobada iyo waxyaabaha keenay baabi'inta.
2. Natiijo waarto haddii laga waayo go'aanka ugu dambeeyo waxaa ka gaaraayo hoggaamiyaha, guddoomiyaha iyo xoghaayaha guud.
3. In xisbiga la baabi'naayo waxaa saxiixaayo Guddoomiyaha ama Hoggaamiyaha xisbiga.
4. Marka la iclaaminayo baab'inta xisbiga waxaa soo jeedinaya golaha fulinta, waxaana loo yeerayaa shirweyne degdeg ah si arrintaan masiiriga ah go'aan rasmi looga qaato.

Qodobka 52aad

Doorashooyinka

1. Xisbigu wuxuu yeelanayaa Gudddi Madaxbanaan ee Doorashooyinka oo maamulaya heerarka kala duwan ee Xisbiga.

2. Shirweeynaha guud ee xisbiga ayaa dhisaya Guddiga Madaxbanaan ee Doorashooyinka Xisbiga.

3. Xeerka ay ku shaqeeynaayo gudigaas waxaaa ansaxinaya Golaha Qaranka ee Xisbiga.

4. Tirada Guddiga Doorashooyinka waa inayna ka badnaan 15 xubnood.

Masuuliyaddaha Guddiga Doorashooyinka waxa ka mid ah:

1. Inay maamulaan doorashooyinka dhammaan Hay`adaha Xisbiga ee heer kasta.

2. Inay si joogta ah u diiwaan geliyaan cod-bixiyayaasha dib u eegisna ku sameeyaan xaashiyaha cod-bixiyayaasha

3. Inay diiwaan geliyaan musharaxiinta doorashooyinka

4. Xallinta cabashooyinka doorashooyinka

5. Fududeynta kor-joogista, illaalinta iyo qiimeynta doorashooyinka.

6. Wacyi gelinta cod-bixiyayaasha.

6. Golaha fulinta ee xisbiga wuxuu magacabaayaa guddiga xallinta cabashooyinka ka imaan karaayo doorashooyinka.

Qoddobka 53aad

Nidaamka loo marayo wax ka bedelidda iyo kaabista Xeerka Xisbiga

1. Wax ka bedelka iyo kaabista xeerka xisbiga waxa la samayn karaa shirweynaha xisbiga waxaana awooda ansixintiisa leh shirweynaha xisbiga.

2. Haddii ay timaado arin lagama maarmaan ka dhigaysa in kaabis ama wax kabedel qodob ama qodobo xeerka ka mid ah waxa soo jeedinaaya hoggaanka sare ee xisbiga ama gudida fulinta oo soo diyaarinaaya iyagoo u maraya wax kabedelka iyo kaabistu mid waafaqsan xeerka xisbiga iyo xeerarka dalka.

3. Hoggaanka sare iyo golaha fulinta waa in ay soo hordhigaan soo jeedinta wax kabedela iyo kaabista golaha dhexe ee xisbiga in la sameeyo iyo in kale, cod ayayna u qaadayaan 1/3 xubnaha Golaha Qaranka. Golaha Qaranka haddii uu ogolaado in xeerka lagu sameeyo kaabista iyo wax kabedelka waxa waajib ku ah in ay u gudbiyaan haayada sharci ahaan ka sareysa oo ah shirweynaha rasmiga ah ama shirweyne aan caadi ahayn.

4. Shirweynuhu markuu helo soo jeedinta iyo ogolaanshaha golaha qaranka waxa u banaan inuu ansixiyo iyo inuu diidoba.

Qoddobka 54aad

Fasiraada Xeerka Xisbiga

1) Haddii xeerka xisbiga khilaaf sharci ka yimaado waxa hoggaanka sare ee xisbiga ku waajib ah in la diwaan galiyo qodobada ama faqradaha laysku khilaafsanyahay fasirkooda.

2) Hoggaanka sare waa inuu hordhigaa qodobadii uu diwaangaliyey kalfadhiga golaha qaranka ee rasmiga ah ama aan caadiga ahayn.

3) Golaha qaranka ee xisbiga waxa ku waajib ah inuu dhageysto doodaha fasiraadaha dhinacyada fasirka ku doodaya, kadibna waa in ay gudi ka kooban golaha qaranka iyo sharci yaqaano aan xisbiga ka tirsanayn u xilsaartaa fasiraada.

4) Gudiga loo xil saaray soo fasirka waa in ay usoo gudbiyaan xoghaayaha golaha qaranka isagoo soo hordhigaaya kalfadhi aan caadi ahyn oo qabsoomaya ugu badnaan afar bilood marka go'aanka gudiga loo xilsaaray ay xoghayaha u soo gudbiso

5) Haddii dhinac ku qanci waayo fasiraada gudida waxa u furan in ay ka dalbadaan in loogu gudbiyo maxkamada dastuuriga ah ee dalka iyadoo codsigaas uu qori doono xoghaayaha golaha qaranka ama ku xigeenkiisu

Qoddobka 55aad

Xeer Hoosaad

1. Golaha qaranka waxa uu soo saari karaa xeer hoosaadyo aan ka horimanayn xeerkan.

Qoddobka 56aad

Dhaqangalka Xeerka Xisbiga

1. Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo shirwaynaha Xisbiga.

Qodobka 57aad

Wakiilada Dalka Bannaankiisa

Dhammaan wakiilada xisbiga u jooga wadanka bannaankiisa waxay masuul ka yihiin,

b) Inay la shaqeeyaan jaaliyadaha Soomaaliyeed.

t) Inay ka shaqeeyaan dib-u-heshiisiinta bulshada.

j) La dagaalanka xagjirnimada laga soo abaabulo qurbaha.

x) Inay la shaqeeyaan safaaradaha Soomaaliyeed ee dalalka ay ku sugan yihiin.

Qodobka 58aad

Sharuudaha Midowga

1. Xisbiga aan la midoobayno waa inuu noqdaa xisbi aan isku mabda'a nahay.
2. Waa inuu noqdaa xisbi aan isku aragti iyo iskumeel u socono.
3. Waa inuu noqdaa xisbi leh aragti iyo hiigsi qaranimo.
4. Aamiinsan simnaanta iyo caddaalada ummada Soomaaliyeed.

Qodobka 59aad

Ansixinta Midowga

1. Waxaa ansixinaayo golaha qaranka ee xisbiga.
2. Ansixinta kahor waxaa lagala tashanayaa guddoomiyaha iyo hoggaamiyaha xisbiga.

Goobta iyo Cinwaanka Sanduuqa Boostada ee Xafiisyada u Diiwaan Gashan Xisbiga Qaransoor.

Xarunta Dhexe ee Xisbiga: Xarunta dhexe ee xisbiga waxay ku taalaa xaafada Hodan laanta Axmed Gurey waxay ku dhagan tahay hoteel Maka Al-mukarama. (Dabaqa 2aad)

Tel: 614 555 333

Wakiilka Gedo: Cabdisamad Xusseen Issaaq Dhaqane

Tel: +252 906 937 578

Wakiilka Togdheer: Cabdihakiim Cabdillaahi Aadan

Tel: +252-63-4075785

Wakiilka Galmudug: Iimaan Maxamed Jimcaale

Tel: 0615189092